PORTLAND PUBLIC SCHOOLS
501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000
Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

# Xoojinta Dugsiyadeena Koonfur-bari

Nofeembar 30, 2022

Qoysaska Koonfur-bari iyo shaqaalaha PPS ee qaaliga ah,
Waxaan rabnaa inaan ku siino xoogaa cusbooneysiin ah oo ku saabsan Isdiiwaangelinta Koonfur-bari & Barnaamijka Hirgelinta Dheelitirka. Xusuusin ahaan, gu'gii la soo dhaafay Guddiga Dugsiga PPS wuxuu ansixiyay isbeddellada xuduudaha dayrta 2023 ee ballaarinaya gelitaanka dugsiyada dhexe, oo xoojiya diiwaangelinta dugsiyada hoose iyo barnaamijyada laba-luqad. Oktoobar 25, 2022, Guddiga wuxuu kaloo ansixiyay qaraarka 6599 si loogu wareejiyo Aqoonyahannada Ingiriisiga Lent ee Marysville bilowga sannad dugsiyeedka 2023-24.

***Sideen ku ogaan karaa dugsiga ay cunugayga/ilmahayga dhigan doonaan?***

- Waxaad ka raadin kartaa cinwaankaaga halkan *si aad u ogaato dugsiga ay carruurtaadu dhigan doonaan.*
- Ardayda fasalada 5aad iyo 8aad waxay helayaan macluumaadka wareejinta boostada.

Waxaan bixin doonaa jawaabaha su'aalaha inta badan la isweydiiyo, waxaanan cusbooneysiin doonaa su'aalahan si aan u muujinno waxa aan ka maqalno bulshada. Maamulahaaga sidoo kale waa kheyraad fiican, waxayna la xiriiri doonaan waaxaha dhexe su'aalaha ay u baahan yihiin in laga jawaabo. Waxa kale oo aad si toos ah noogula xiriiri kartaa Aan Wada Hadalno. Waxaad ka heli kartaa cinwaankaaga halkan, oo booqo websaydkeena cusub si aad u hesho warar cusub, FAQs iyo isku xiridda waxtarka leh ee ku saabsan hirgelintan.

*Cusbooneysiinta Muhiimka ah:*
Waxaa jira barnaamijyo badan, xuduud, iyo/ama isbedel qaab dugsiyadeena dhexe ee SE. Haddii aad rabto inaad codsato beddelaad dugsi kale, fadlan halkan ku soo gudbi codsi ugu dambayn December 16.

Waaxyaha xafiiska dhexe waxay la shaqaynayaan la-hawlgalayaasheenna si loo balaariyo daryeelka ilmaha iyo fursadaha kobcinta dugsiga kadib ardayda iyo dugsiyada ay saamaysay

qorshaynta SEGC. Waxaan sidoo kale si dhow ula shaqeyneynaa waaxdeena gaadiidka si aan u hubinno helitaanka gaadiidka.

Haddii isbedel kasta ay saameyn ku yeeshaan, filo inaad maqasho fursado badan oo aad ku baran karto bulshadaada cusub ee dugsiga bilaha soo socda.

Waad ku mahadsan tahay taageeradaada iyo dulqaadkaaga inta lagu jiro hirgelintan, waxaanan rajeyneynaa inaan si toos ah kula xiriirno bulshadaada dugsiga oo horay u socota.
Kooxda Isdiiwaangelinta Koonfur-bari iyo Hirgelinta Dheelitirka